

## Bayaanka Saameynta Saamiga ee UP Academy Boston

**Ciwaan** UP Academy Boston (UAB) Heshiiska Is-afgaradka (MOU) iyo  
**nka:** UAB iyo UP Academy Dorchester (UAD) Heshiiska Maamulka **Taariih:** Arbaca, Bisha Todobaad 14, 2021

Waa maxay [Qalabka Qorshaynta Sinaanta Sinjiga](#) la isticmaalay?  Haa  Maya  
 Hadday haa tahay, geli taariikhda (yada) kulammada REPT kuna xirnow dhammaystirka halkan:

Miyaa xubin ka tirsan Qeybta Saamiga, Istaraatiijiyada iyo Farqiga Fursadu dib u eegay bayaankan?  Haa  Maya

Qaybaha Qalabka Qorshaynta Sinaanta Sinnaanta BPS	Soo-koobid/Sabab
<p>1. <b>Soo jeedin / Soo bandhigid &amp; Saamayn</b>  <i>Waa maxay natiijooyinka la rabo ee codsiyada/dadaalada, oo ay ku jiraan ka saarida meesha khilaafka? Yaa hogaamiyey shaqadan/qorsheyntan, oo miyey ka turjumayaan aqoonsiga kooxaha ardeyda iyo qoysaska (kooxaha muhiimka ah oo ay ku jiraan shakhsiyaadka Madaw, Latinx, Eeshiyaanka ah, Dhaladka ah, muhaajiriinta, luuqadaha badan, ee leh khibrada Waxbarasho Gaara)?</i></p>	<p>Cusbooneysiinta axdiga cusub ee UAB , dhowr dukumenti ayaa loo baahan yahay si ay uga turjumaan taariikhaha mudada axdiga cusub - lagu magacaabo UAB ee MOU ee BPS iyo UAB, iyo Heshiiska Maamulka UAD ee UAB/UAD Golaha Boodhka. Waayo waxa kuwan la cusbooneysiyeey Ogos 2020 ka qeyb ahaan nidaamka cusbooneysiinta axdiga, isbadeeda labada dukumentiyada kooban oo imika cusub, heshiisyada, iyo shuruudaha in imika Waaxda Waxbarashada Dugsiga Hoose iyo Sare (DESE) cusbooneysiyeey axdiga UAB. Cusbooneysiinta ugu muhiimsan ee MOU waa ku darka kaliya ee kalmadaha "Siyaasada saamiga" si loo hagaajiyo waafaqsanaanta UP ee hirgalinta BPS siyaasadaha saamiga.</p> <p>Si guud, MOU iyo Heshiiska Maamulku waxay dejinayaan qaab-dhismeedka xiriirka UAB ee BPS iyo Golaha, waxayna awood u siinaysaa UAB inay sii wado siinta waxbarasho kolej iyo horumarin xirfadeed oo wanaagsan bulshada ardeydayada dhaqan ahaan iyo isir ahaan kala duwan. Waxaanu ka shaqeynaa inaan siino oo ilaalino natiijooyin isku mida dhamaan ardeyda iyadoo la aqoonsanaayo waxna laga qabanaayo cadaalad darada shakhsi iyo haayadeed, dibna loo baarayo xeerarka iyo siyaasadaha iyadoo laga eegayo dhanka bilaa tacadiga. Natiijooyinka ardeydayadu waxay ahaayeen kuwo wanaagsan markaloo eego inta kale ee BPS. Diwaangalintu waa bakhtiyaanasiib dhamaan inta degan Boston. Isdiwaangalinta hada ee UAB waa 97% ardey oo Midab leh, 28% ardeyda leh Qorshaha Waxbarasho Gaara, iyo 24% Bartayaasha Ingiriisida ah (ELs). Labadaba hogaamiyayaasha dugsigu waa dad Midab le, oo kuwa soo jeediyey waxkabadelka waxa ansixiyey Golaha UAB (4 ee 8 xubnood ee dadka midab kaleh).</p>
<p>2. <b>Waafaqsanaanta Qorshaha Istaraatiijiga ah</b>  <i>Sidee baa qorshaha istaraatiijiga degmadu u waafaqsan yahay codsiga/dadaalka?</i></p>	<p>Jihada siyaasadeed ee BPS ee waxbarashadu waxay ku xeeran tahay:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Xoojinta waxbarashada iyo hogaanka dugsiga.</li> <li>● Dheegashada guusha iyo waxka badelka meelaha hooseeya.</li> <li>● Dibu xoojinta la shaqeynta waalidka, ardeyda iyo</li> </ul>

	<p>bulshada.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Dibu nashqadaynta adeegyada degmada si ay waxtar, wanaag iyo sinaan u yeeshaan.</li> </ul> <p>UAB iyo UP, waxaanu gabi ahaanba waafaqsanahay jidahan. Waxaanu dhisnay nidaam macalin, hogaamiye macalin, iyo barnaamij maamule si aan u hubino waxbarashada iyo hogaanka dugsigu inuu wanaagsan yahay. Waxaanu maalgashanaa iskuduwayaasha qoyska ku saleysan waxaan leenahay Agaasime Maamulka Sinaanta iyo Shaqada ee shabakada ah. Waxaanu la shuraakownay degmada iyo nidaamka xogta oo waafaqsan iyo la wadaagista xogta si aan u kordhino shaqo wanaaga.</p>
<p><b>3. Falanqeynta Xogta</b> <i>Xogtee ayaa la falanqeyey? Miyaa lagula kala saaray jinsiga iyo kooxa kale? Maxay muujisay oo khuseysa kala duwanaanshaha?</i></p>	<p>Xogta waxqabadka ardeyda UAB waxa dib si joogto ah ugu eega dugsiga iyo shabakada shaqaalaha UAB, Golaha UAD, waxaana kala saara isir, baahiyo gaara, iyo xaalada EL. Xogta waxqabadka ardeyga ee ardeyda Madow iyo Latinx waxa la barbar dhigaa dhigooda Cadaanka iyo Eeshiyaanka ah. Inkastoo waxqabadka ardeyda bahiyaha gaarka ah leh iyo Bartayaasha Ingiriisidu ka danbeeyaan kooxo kale, UAB waxay si firfircoon ugu hawlan tahay horumarinta xirfadeed iyo waxqabadka baahiyahooda. Dugsiga, shabakada, iyo Golaha sidoo kale si joogto ah ayaa dib loogu eegaa dhaqanka kala saarka, xaadiriska, iyo xog ururinta, oo keenaysa siyaasado horumarsan si kor loogu waado wakhtiga waxbarashadam gaar ahaan ardeyda kasoo jeeda bulshooyinka la takooro.</p>
<p><b>4. Kaqeybgalka Daneeyeyaasha</b> <i>Yaa ka shaqeyey (tirada, kooxaha muhiimka ah, iyo doorarka) iyo sida, iyo waxa natijadu noqotay? Maxaa ardeyda/qoysaska inta ugu badan saameeyey codsigan/dadaalkan?</i></p>	<p>UP waxay si joogto ah ugu hawlan tahay ardeyda iyo qoysaska si ay usoo ururiso jawaabcelin barnaamijkeena ah. Tani waxa ku jira xog-ururin, wareysiyo koxo, saacado shaah, gole waalid, iyo xaflado bulsho. Waxaanu sidoo kale fududeynaynaa nidaamka qorsheynta siyaasada mudada dheer ee ardeydayada, qoysaska, iyo shaqaalaha ku hawlanaayeen, oo ay ku jiraan wakiilo wareysi kooxedyo dadaalaya oo ardeydayada/qoysaska bulshada ah.</p>
<p><b>5. Xeeladaha Sinnaanta Jinsiyada</b> <i>Sidee ayuu codsigan/dadaalkan u yareeyey kala duwanaanshaha una kordhiyey jinsiga iyo saamiga kale? Waa maxay cawaaqibta aan lagu talo galin ee macquulka ah? Istaraatiijayadehee ayaa kor u qaadaya saamiga?</i></p>	<p>UAB waxay ka qeyb tahay siyaasada degmada oo dhan ee lagu yareynaayo farqiga u dhaxeeya fursadaha. Gaar ahaan, BPS waxay weydiisay UAB inay badesho dadaalka dugsiga dhexe ee golaha ardeyda ee u badan Midabka. Ansixinta UAB la cusbooneysiisay MOU iyo Heshiiska Maamulku wuxuu taageeri doonaa hawlgalka wanaagsan ee horusocodka leh ee ardeyda iyo qoysaska, wuxuuna hubinayaa in UAB sii wado inay siiso akhtiyaar tayo leh ardeyda, gaar ahaan ardeyda Midabka leh, iyadoo la maraayo nidaam hawlo laga heli karo nidaamka codsiga furan ee degmada. Waxa intaasi dheer, MOU waxay si gaara u magacaabaysaa waafqsanaanta UAB ee siyaasadaha sinaanta iyo borotokoolka degmada.</p>

<p><b>6 Miisaaniyada &amp; Hirgalinta</b> <i>Waa maxay saameynta miisaaniyadu? Sidee fulintu u xaqiijin doontaa ujeedooyinka oo dhan, gaar ahaan ujeedooyinka sinnaanta la xiriira, in la fuliyo? Waa maxay kooxaha aqoonsiga kale ee kooxda hirgalita, oo miyey eegi doonaan saamiga?</i></p>	<p>Maalgalinta UAB waxa lagu daray miisaaniyada guud ee BPS sanadkasta ilaa 2011, imikana waxa lagu daray miisaaniyada FY22. Ansixinta waxkabeladan ma badeli doonto kharashaadka. Hogaanka Shabakadaha Waxbarashada ee UAB iyo UP wuxuu si kordhaysa u matalayaa ardeydeena, wuxuuna ka eegayaa dhamaan go'aamada indho sinaana.</p>
<p><b>7. La Xisaabtanka &amp; Isgaarsiinta</b> <i>Sidee ayaa sameeynta loo qiimeyn doonaa, qori doonaa looguna gudbin doonaa daneeyayaasha? Yaa ka masuul noqon doona?</i></p>	<p>UAB la cusbooneysiyeey MOU iyo Heshiiska Maamulka UAB UAD labadaba waxa ansixiyey golaha wuxuuna helay ansixinta DESE. Hadii Gudidada Dugsigu ansixiso isbadeladan, waxay u baahan doonaan ansixinta Midowga Macalimiinta Boston iyo DESE. DESE, BPS, iyo Golaha UAB waxay masuul ka yihiin kormeerka iyo isla xisaabtanka. Nidaamka isla xisaabtanka ee DESE ee dhamaan dugsiyada, Shuruuda Waxqabadka Axdiga Dugsiga, iyo BPS iyo nidaamka gudaha UPs waxay siinayaan kormeer joogto ah iyo xeerar.</p>